



Warbixinta Waxqabadka Hay'adda Waddooyinka Puntland

Rubaca 2aad (April-June)2025

*10th Jan 2026
Office of the CEO
Puntland Highway Authority*

Contents

.....	4
1. Hordhac	4
2. Waxqabadka maamulka iyo maaliyadda	5
2.1 shirka toddobaadlaha ah ee Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland	5
2.2 saxiixa iskaashiga Hay'adda PHA iyo Shirkadda Merit Advisory.....	5
2.3 tabobarka howlwadeennada maamulka iyo maaliyadda iyo adeegsiga teknoolojiysdds ERP ...	5
2.4 Kalfadhiga golaha sare (BoD) ee Hay'adda Waddooyinka Puntland	6
3. Waxqabadka awoodsiinta hay'adda ee dhinaca farsamada dhismaha sahanka iyo shaybaarka ..	7
3.1 Awoodda howlwadeennada PHA ee dhinaca Cilmi-baarista Iyo Hal'abuurka.....	7
4. Waxqabadka dhismaha,dayactirka iyo yareynta shilalka waddooyinka Puntland	8
4.1 Waxqabadka dayactirka godadka laamiga	8
4.1.1 Wajiga labaad ee dayactirka godadka laamiga weyn.....	8
4.1.2 Dayactirka godadka laamiga Garoowe iyo Laascaanood	8
4.1.3 Dayactirka Godad Buuxinta Rabaable-Birtadheer.....	8
4.1.4 Dayactirka godad buuxinta Bacaadweyn – Cagaaran	8
4.2 Waxqabadka nadiifinta biyo mareennada.....	9
4.2.1 Nadiifinta biyo mareennada laamiga Qardho Illaa Carmo	9
4.2.2 Nadiifinta Biyo mareennada (Culverts) Carmo ilaa Boosaaso.....	9
4.2.3 Nadiifinta biyo mareennada (Culverts) Qardho ilaa Garoowe.....	9
a. Waxqabadka dhismaha	10
4.3.1 Dib u dhiska 22 buundo (Culverts) ee Boosaaso – Laasadawaco.....	10
4.3.2 Mashruuca Dib u dhiska Waddada Bardo-Dawaco.....	10
5. Waxqabadka dhismaha,dayactirka iyo yareynta shilalka waddooyinka Puntland	11
5.1 furitaanka tartanka qandaraaska mashruuca dib u dhiska waddada Gaalkacyo - Bacaadweyn	11
.....	11
5.2 kormeerka wajiga labaad ee dayactirka godadka laamiga weyn	11
5.3 kormeerka shaqada nadiifinta biyo mareennada laamiga Qardho Illaa Carmo.....	11
5.4 kormeerka waddada Berda-Dawaco	12
5.5 kormeerka dayactirka iyo nadiifinta biyo mareennada Boosaaso ilaa Carmo.....	12
5.6 kormeerka dhismaha biyo mareennada Boosaaso - Laasadawaco.....	12
5.7 kormeerka dayactirka waddada laamiga Xarfo - Bacaadweyn	12
5.8 kormeerka dhismaha miisaanka xamuulka gaadiidka ee Boosaaso	13

5.9 kormeerka dhismaha jidka Bardo-Dawaco.....	13
5.10 kormeerka dayactirka biyo mareennada (Culverts) deegaanka Sinujiif.....	13
5.11 kormeerka dib u dhiska waddada Ooman - Kalabayr.....	14
6. Waxqabadka xoojinta xiriirrada kala duwan ee Hay'adaha PHA	15
6.1 Xiriirka Hay'adda ee Dowladda Puntland.....	15
6.2 Xiriirka Hay'adda PHA iyo Hay'adaha Caalamiga ah	15
6.3 Xiriirka Hay'adda ee Dadweynaha.....	15
6.3.1 farriinta wacyielinta gaadiidlayda qaada xamuulka	15

1. Hordhac

Warbixinta waxqabadka hay'adda ee saddexda bilood ee April, May Iyo June sannadka 2025 ka waa warbixin soo koobaysa waxqabadkii iyo guulihii ay hay'addu ka gaartay shaqooyinkii qorsheysnaa iyo sidoo kale shaqooyinkii aan ku jirin qorshaha balse lagu guuleystay in la qabto.

Warbixintan ayaa ku salaysan qorsheyaasha waxqabad ee hay'adda sannadka 2025 sidoo kalena ku jaan go'an ujeedooyinka Hay'adda ee horumarinta awoodda maamulka, dayactirka jidadka iyo yareynta shilalka, kormeerka mashaariicda dhismaha waddooyinka iyo sidoo kale xoojinta xiriirka ay hay'addu la leedahay Dowladda, hay'ada caalamiga iyo dadweynaha.

Ujeedooyinka Hay'adda ee sannadka 2025

1. Horumarinta Awoodda Maamulka iyo Maaliyadda Hay'adda
2. Horumarinta Awoodda Hay'adda ee Farsamada dhismaha iyo sahanka waddooyinka.
3. Dib u dhiska, dayactirka iyo horumarinta jidadka laamiga weyn.
4. Maamulka, kormeerka iyo dabagalka Mashaariicda dayactirka ee horumarinta Jidadka.
5. Xoojinta Xiriirka Hay'adda PHA ay la lahayd Hay'adda Caalamiga iyo deeq bixiyaasha , Dowladda iyo dadweynaha, lana dhiso sumcadda Hay'adda.

2. Waxqabadka maamulka iyo maaliyadda

2.1 shirka toddobaadlaha ah ee Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland

6dii April, Gudoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland Dr. Abdifitah Mohamed Sugule, Ayaa guddoomiyay Shirka Toddobaadlaha ah Ee Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland. PHA.

Shirka waxaa ka soo qaybgalay Gudoomiye kuxineenka Hay'adda Abdirizak Mohamed Hayir, Agaasimayaasha Waaxyaha, Madax qeybeedyadda iyo Injinneeradda, Waxaana looga hadlayey Wixii qabsoomay Asbuucyadii la soo dhaafay, iyo qorshaha Asbuucyada soo socda.



2.2 saxiixa iskaashiga Hay'adda PHA iyo Shirkadda Merit Advisory

29kii May, Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA) iyo shirkadda Merit Advisory ayaa kala saxiixday heshiis iskaashi oo lagu horumarinayo nidaamka maamulka xisaabaadka iyo hirgelinta ERP System casri ah. Ujeedada heshiiskan waa kor u qaadidda isla xisaabtanka, hufnaanta maamulka iyo tayeynta shaqaalaha hay'adda.



2.3 tabobarka howlwadeennada maamulka iyo maaliyadda iyo adeegsiga teknoolojiysdds ERP

30kii May, Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA) oo kaashanaysa shirkadda Merit Advisory ayaa tabobar u qabatay shaqaalaha Hay'adda, tabobarkaan oo ku saabsan maamulka maaliyadda iyo adeegsiga nidaamka casriga ah ee ERP (Enterprise Resource Planning).

Hay'adda PHA waxay sii wadi doontaa dadaallada ay ugu jirto tayeynta shaqaalaha iyo hirgelinta teknoolojiyadda casriga ah si loo helo adeegyo tayo leh oo dhanka horumarinta kaabayaasha waddooyinka ah.



2.4 Kalfadhiga golaha sare (BoD) ee Hay'adda Waddooyinka Puntland

25kii June waxaa furmay Kalfadhiga golaha sare (BoD) ee hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland. Kulanka ayaa hay'addu kusoo bandhigtay waxqabadka hay'adda, Qorshaha 2025 iyo ka doodista mashaariicda hortabinta leh.


Kulanka waxaa guddoomiyay Wasiirka Howlaha Guud, waxaana goob joog ka ahaa Wasiirka Maaliyadda, Wasiirka Qorshaynta, Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada iyo Ganacsade Jaamac Dhagadheere. Sidoo kale waxaa shirka ka qaybgalay Guddoomiyaha hay'adda, ku xigeenkiisa iyo Injineero katirsan PHA oo soo bandhigay xogta mashaariicda Hortabinta leh



3. Waxqabadka awoodsiinta hay'adda ee dhinaca farsamada dhismaha sahanka iyo shaybaarka

3.1 Awoodda howlwadeennada PHA ee dhinaca Cilmi-baarista Iyo Hal'abuurka

Madaxa Cilmi-Barista iyo Hal-abuurka ee Hay'adda Waddooyinka Puntland Eng. Shuayb Abdinour Osman ayaa Cilmi-Baaris uu leeyahay kuna saabsan "Flash Flood Susceptibility and Inundation Mapping Using Shannon's Entropy, Statistical Index, and HEC-RAS, in Jubba River Basin (Somalia)" lagu daabacay buugga Progress in Multicriteria Decision Making Models ee ay leedahay Springer Nature. Cilmi-Baaristan ayaa si gaar ah u iftiimisay hal-abuurka, kartida, iyo aqoonta sare ee Eng. Shuayb ku leeyahay maareynta khatarta daadadka iyo fahamka juqraafigeed ee deegaanka.



4. Waxqabadka dhismaha, dayactirka iyo yareynta shilalka

4.1 Waxqabadka dayactirka godadka laamiga

Hay'adda Waddooyinka Puntland ayaa shaqo joogta ah ka qabata dayactirka waddooyinka Puntland oo lagu dhisayo cashuurta shacabka. Waxaana ka mid ah waxqabadyada buuxinta godadka ku samaysay laamiga weyn ee isku xira gobollada Puntland.

4.1.1 Dayactirka godadka laamiga Qardho iyo Garoowe

10kii April, Hay'adda waddooyinka Dowladda Puntland (PHA) ayaa bilawday wejigii labaad ee Dayactirka Godadka ka samaysmay Laamiga weyn dhexdiisa, Waxaana laga bilaabay Qardho waxaana la dhamaystiri doonaa illaa Garoowe. Waxaana la dayactiray Masafo dhan 47 KM.

Wejigii kowaad ee Dayactirka waxaa ay Hay'addu horay usoo Dhamaysay Qardho ilaa Boosaaso oo la buuxiyay dhamaan Godadkii waddada dhexdeeda ka samaysmay.



4.1.2 Dayactirka godadka laamiga Garoowe iyo Laascaanood

28kii April, Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA) ayaa soo gaba-gabaysay dayactirkii godad buuxinta ee waddada Garoowe iyo Laascaanood, iyada oo la buuxiyey dhamaan godadkii ka samaysmay waddada dhexdeeda.

Shaqadaas oo hay'addu gacanta ku haysay ayaa ka mid ah mashaariicda dayactirka joogtada ah ee waddooyinka Puntland ee lagu dhisayo cashuurta shacabka.



4.1.3 Dayactirka Godad Buuxinta Rabaable-Birtadheer.

Hay'adda Waddooyinka Puntland ayaa si fiican u wada Maalintii 2aad shaqada Dayactirka Godad buuxinta Rabaable-Birtadheer. Iyada oo maanta la dayactiray masafo dhan 2 KM.

Shaqadan ayaa kamid ah mashaariicda dayactirka iyo dib u dhiska waddooyinka Puntland Oo lagu maalgaliyay cashuurta dadka Puntland.



4.1.4 Dayactirka godad buuxinta Bacaadweyn - Cagaaran

31dii May, Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland (PHA) ayaa dhamaystirtay Dayactirka ka godad buuxinta ah iyada oo la buuxiyay Godadkii ka samaysmay Laamiga dhexdiisa inta u dhaxaysa Bacaadwayn-Cagaaran.



4.2 Waxqabadka nadiifinta biyo mareennada

Hay'adda Waddooyinka Puntland ayaa shaqo joogta ah ka qabata dayactirka waddooyinka Puntland oo lagu dhisayo cashuurta shacabka. Waxaana ka mid ah waxqabadyada nadiifinta biyo mareennada ku yaal laamiga weyn ee isku xira gobollada Puntland.

4.2.1 Nadiifinta biyo mareennada laamiga Qardho Illaa Carmo

10kii April, Hay'adda waddooyinka Dowladda Puntland (PHA) ayaa bilawday Nadiifinta biyo mareennada Laamiga (Culverts) iyadoo Biyo mareennada ku yaal Qardho ilaa Carmo laga nadiifinayo dhammaan waxyaalaha xannibaya biyihii mari lahaa Sida: dhagxaanta, Dhirta iyo dhamaan waxyaalaha kale ee biyaha xannibaya. Waxaana ilaa hadda laga shaqeeyay 38 biyo mareen (Culverts) oo kuyaal masafo dhan 42km. Ugu dambayn 13 kii April waxaa biyo mareennadii la nadiifiyay si fiican uga gudbay biyihoo roobabkii Gu'ga.



4.2.2 Nadiifinta Biyo mareenada (Culverts) Carmo ilaa Boosaaso

Hay'adda Waddooyinka Puntland ee PHA iyadoo ka duulaysa ilaalinta Badqabka Biyo mareenada ku yaalla laamiga weyn ee isku xira Gobollada Puntland, waxay ku howlantahay Nadiifinta dhumaha biyaha qaada si looga fogaado saamayn ka dhalata daadadka Roobka.

Hawlwadeenada hay'adda ayaa kannaalada biyaha qaada ka sifayenaya dhagaxa, dhirta, ciidda iyo walxaha kale ee caqabadda ku noqon kara qulqulka biyaha. Waxaa 21kii April la diyaariyay 15 biyo mareen iyada oo la jaray masafo dhan 17 KM oo u dhaxaysa Carmo iyo Bosaso.



4.2.3 Nadiifinta biyo mareennada (Culverts) Qardho ilaa Garoowe.

Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland (PHA), Ayaa wada Nadiifinta biyo mareenanda (Culverts), Kuyaal Laamiga weyn ee u dhexeeya Qardho-Garoowe. Nadiifinta biyo mareenanda ayaa kamid ah Dayactirada joogtada ah oo ay Hay'addu fuliso kana wado laamiga isku xira Gobollada Puntland.

Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland (PHA), Ayaa 21kii May dhamaystirtay Nadiifinta biyo mareennada (Culverts) kuyaal Laamiga weyn ee u dhexeeya Qardho-Garoowe



a. Waxqabadka dhismaha

4.3.1 Dib u dhiska 22 buundo (Culverts) ee Boosaaso - Laasadawaco.

Waxaa meel gebo-gebo ah maraya Mashruuca dib u dhiska 22 Buundo (Culverts) ee Boosaaso-Laasodawaco oo kamid ah mashaariicda dib u dhiska Jidadka Puntland ee ay maalgalinayso Dowladda Puntland, waxaana Kormeeraya isla markaana Tayada hubinaya Hay'adda Wadooyinka Puntland (PHA).waxaana la dhameeyey dhammaan Shubka 22 biyo mareen (Culverts) waxaana dhamaantood la dhigay biyo-mareennadii cusbaa ee shubka ahaa iyo buuxintooda(backfilling), waxaana hadda socda dhigista MC 30, waxaana maalmaha soo socda lagu dhamaystiri doonaa qaybta u dambaysa oo ah dhigista Laamiga.



4.3.2 Mashruuca Dib u dhiska Waddada Bardo-Dawaco.

Waxaa Meel fiican maraya Mashruuc Dib u dhiska Waddada Bardo-Dawaco. oo ka mid ah mashaariicda dib u dhiska waddada halbowlaha ah. mashruucu oo ka koobnaa 15km ayaa 6.5km ka mid ah la saaray Laamiga (Surface dressing). Iyada oo horey looso gabagabeeyey Garbaha Waddada iyo Biyo Mareennda. Mashruucan oo ay kormeerayso hay'adda PHA, waxaa maalgalinaysa Dowladda Puntland, waxaana fulinaysa shirkadda Wadaniga ah ee Albaashid.



5. Waxqabadka dhismaha, dayactirka iyo yareynta shilalka waddooyinka Puntland

5.1 furitaanka tartanka qandaraaska mashruuca dib u dhiska waddada Gaalkacyo - Bacaadweyn

21kii June, Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland (PHA) ayaa si rasmi ah u furtay Tartanka Qandaraaska Mashruuca dib u dhiska Waddada isku xirta Gaalkacyo iyo Bacaadweyn ee gobolka Mudug.

Munaasabadda Furitaanka Tartanka waxaa kasoo qaybgalay xubnaha Guddiga Sare (BOARD) ee hay'adda, oo kala ah; Wasiirka Hawlaha Guud Farax Cawad, Wasiirka Maaliyadda Maxamed Faarax, Wasiirka Qorshaynta Daa'uud Bisinle, Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada Maxamed Jaamac, Agaasimaha Bangiga Puntland Khadar Ugaas iyo Guddiga fulinta (Executive).



5.2 kormeerka wajiga labaad ee dayactirka godadka laamiga weyn

17kii April, Agaasimaha Waaxda Dayactirka Hay'adda Waddooyinka Puntland, PHA. Eng. Maxamuud Daahir Siciid, Ayaa kormeeray Shaqada Wajiga Labaad ee Dayactirka Godad buuxinta ah ee ay Hay'addu ka fulinayso Waddada inta u dhexaysa Qardho ilaa Garoowe, iyada oo Hay'addu ay Horay wejigii kowaad ee dayactirka Godad buuxinta ah ay soo dhamaysay Waddada inta u dhaxaysa Qardho ilaa Boosaaso.



5.3 kormeerka shaqada nadiifinta biyo mareennada laamiga Qardho Illaa Carmo

18kii April, Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dayactirka Eng. Maxamuud Daahir Siciid, Ayaa kormeeray shaqada Nadiifinta biyo Mareennada Waddada (Culverts) ee ay Hay'addu ka fulinayso Waddada inta u dhaxaysa Qardho ilaa Carmo. Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dayactirka ayaa kormeerkiisii ka dib uga mahadceliyay Howlwadeennada Shaqada Wanaagsan ee ay hayaan kulana dardaarmay inay sii laba jibbaaraan.



5.4 kormeerka waddada Berda-Dawaco

18kii April, Guddoomiyaha ku Xigeenka Hay'adda Waddooyinka Puntland PHA, Abdirisak Mohamed Hayir oo uu Weheliyo Agaasimaha Waaxda Injinneerinka Eng. Abdimahad Mohamed Farah (Huruuse) ayaa kormeer ku tegay Waddada Berda-dawaco halkaas oo laga waday dib u dhiska dhuun biyood (Pipe Culver) taas oo ay dhisayso Shirkada Al-baashid.



5.5 kormeerka dayactirka iyo nadiifinta biyo mareennada Boosaaso ilaa Carmo

26kii April, Gudoomiyaha Hay'ada Waddooyinka Puntland, Dr. Abdifitah Sugule ayaa kormeeray shaqada Dayactirka iyo nadiifinta biyo mareennada, Bosaso Carmo oo meel gabo gabo ah maraya.

Holwadennada Hay'adda oo gacanta ku haya mashruuca dib u dhiska 22 buundo ee Boosaaso illaa Laasadawaco ayaa Guddoomiyaha la wadaagay in manta 7 Culverts la saaray daamuurka iyada oo awalna la saaray 14 taas wadarta Culverts ka la saaray daamuurka ka dhigaysa 21, halka ay ka shaqo u dhimantahay keliya 1 Culvert.



5.6 kormeerka dhismaha biyo mareennada Boosaaso - Laasadawaco

28kii April, Guddoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA) Dr Cabdiftaax Sugule iyo Agaasimaha Waaaxda Injineerinka Eng Huruuse Abdi, Ayaa kormeeray dhismaha biyo mareennada Bosaaso- Laasadawaco oo maanta soo gabogabawday, lana saaray laamiga buundadii (culverts) 22aad.



5.7 kormeerka dayactirka waddada laamiga Xarfo - Bacaadweyn

17kii May, Guddoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland Dr Cabdiftaax Sugule iyo Xildhibaan C.wali indhoceel. Ayaa kormeeray dayactirka waddada laamiga Xarfo- Bacaadwayn oo Hay'dda PHA ay fulinsayso. Waxaana laga maalgaliyay cashuurta dadka Puntland.



5.8 kormeerka dhismaha miisaanka xamuulka gaadiidka ee Boosaaso

3dii June, Agaasimaha waaxda badbaadada wadooyinka Eng Mohamoud Farah Jama ayaa kormeer ku tagay dhismaha miisaanka xamuulka gadiidka isaga oo u kuurgelayey halka ay marayso shaqada dhismaha oo laga dhisayo Kantaroolka Bosaso. Agaasimaha oo uu weheliyo Eng Siciid Maxamed Siciid ayaa goob joog u ahaa shubka dhismaha miisaanka oo dhismihiisa ay fulinaysay shirkada Hantaara Construction Company.



5.9 kormeerka dhismaha jidka Bardo-Dawaco

13kii June, Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda Waddooyinka Puntland Abdirizak Mohamed Hayir oo ay weheliyaan Agaasimayaasha waaxyaha Injinneerinka iyo Shaybaarka ayaa kormeer Shaqo ku tagay mashruuca Dhismaha Jidka Bardo-dawaco oo maanta lasoo gabagabeeyey. Mashruucan ayaa intii uu socday waxaa dib u dayactir loogu sameeyay masaafdo dhan 9km oo laami la saaray, dhismaha dhuumo biyuhu maraan iyo dayactir lagu sameeyay ilaa 18 culverts oo horay u jirey. Mashruucan waxaa fulinaysay Shirkadda Albashid waxaana Korjoogteenaysay Hay'adda Waddooyinka Puntland.



5.10 kormeerka dayactirka biyo mareennada (Culverts) deegaanka Sinujiif

14kii June, Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda Waddooyinka Puntland Abdirizak Mohamed Hayir oo ay Weheliyaan Agaasimaha Waaxda Injineerinka iyo Agaasimaha Waaxda Shaybaarka ayaa kormeer qiimayn ah ku tagay biyo mareennada (Culverts) deegaanka Sinujiif oo dib u dayactir lagu sameeyay. Kormeerka waxaa sidoo kale qayb ka ahaa madaxda shirkadda Al Bashid oo fulinaysay shaqadan, waxayna warbixin ku saabsan shaqada socota siiyeen wefdiga Hay'adda ee kormeerka ugu yimid.



5.11 kormeerka dib u dhiska waddada Ooman - Kalabayr

18kii June, InjineeradaTaya dhowrka Hay'adda Waddooyinka Dawladda Puntland (PHA). Ayaa kormeer ku tegay Ooman-Kalabayr oo ay ka socota shaqada dib u dhiska waddada. Injineerada Shaybaarka ayaa shaqo tayo hubin ah ka sameeyay masaafo dhan 3km waxaana laga qaaday labo Test oo kala FDT iyo DCP, oo lagu ogaanayo tayada lakabyada ciidda iyo awoodda iska-caabinta culayska xamuulka. Mashruucan oo ay kormeerayso Hay'adda PHA, waxaana Maalgalinaysa Dowladda Puntland, waxaana fulinaysa shirkadda KEBARCO.



6. Waxqabadka xoojinta xiriirrada kala duwan ee Hay'adaha PHA

Xoojinta xiriirka Hay'adda Waddooyinka Puntland ee ay la leedahay hay'adaha caalamiga ah iyo deeq bixiyaasha, Dowladda iyo dadweynaha wuxuu ka mid yahay ujeeddooyinka aasaaska u ah gaarista himilooyinka Hay'adda ee horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ee Puntland.

6.1 Xiriirka Hay'adda ee Dowladda Puntland

Hay'adda waddooyinka DPL, waxay xoojisay xiriirka kala dhaxeeya hay'addaha kala duwan ee dawladda Puntland oo ay ka dhaxeeyso wada shaqaynta ku aaddan horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ee Puntland, iyadoo si fiican warbixinadda iyo xogaha u kala qaata.

6.2 Xiriirka Hay'adda PHA iyo Hay'adaha Caalamiga ah

Hay'adda Waddooyinka Puntland waxaa muhiim u ah xoojinta xiriirka Hay'adaha caalamiga iyo deeqbixiyaasha Caalamka ee ay wada shaqayntu kala dhaxayso, si ujeeddadaas loo hirgeliyana

waxaa ay Hay'addu kulamo lagu xoojinayo xiriirka Hay'adaha Caalamiga ah si joogto ah kula qaadataa xafiiska Hay'adda, sidoo Kalena waxa ay qayb ka ahayd kulammo Hay'adaha caalamiga ah si guud ula yeeshaan hay'adaha kala duwan ee Dowladda Puntland.

6.3 Xiriirka Hay'adda ee Dadweynaha

Hay'adda Waddooyinka Puntland PHA waxa ay mudnaan siisay xiriirka la leedahay dadweynaha Puntland, waxaana ay Hay'addu si joogto ah warbixinnada shaqooyinka ay dadka u hayso ay u la wadaagtaa bulshada iyada oo u marinaysa website ka hay'adda <https://pha.pl.so> iyo boggaga ay ku leedahay warbaahinta casriga ah sida Facebook Iyo Twitter.

Hay'addu Waxa ay sidoo kale ka qayb noqotaa madallada looga hadlayo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha gaar ahaan waddooyinka si ay u gaarto aragtida bulshada taas oo fududeysay helidda baahiyaha degdegga ah ee bulshadu u qabaan isla markaas Hay'addu ku howlgasho ka jawaabistooda.

6.3.1 farriinta wacyielinta gaadiidleyda qaada xamuulka

Ka dib markii la Hay'adda Waddooyinka Puntland hirgelisay xarunta xakamaynta xamuulka gaadiidka waaweyn ee Magaalada Boosaaso, waxaa Hay'addu diiradda saartay wacyigelinta gaadiidleyda qaada xamuulka iyada oo farriimaha wacyigelinta loo marinayo warbaahinta casriga iyo baraha Hay'addu ku leedahay baraha bulsada sida Facebook. Waxaana farriintii kowaad oo muuqaal ah Hay'addu baahisay 29 kii May kuna socota gaadiidleyda qaada xamuulka ee adeegsata waddooyinka Puntland.